



**April 16, 2025**

## **Mawduuca: Warbixinta cusub ee Xarunta Carruurnimada Hore ee Starms**

Qoysaska iyo Shaqaalaha Starms ee Qaaliga ah,

Waxaanu warqaddaan kuugu soo qoraynaa si aan kuu siino warbixin ku saabsan shaqada cusboonaysiinta liidhka ee ka socota dhismaha dugsigaaga. Waxaan maqalnay codsiyada qoysaska ee ku saabsan in la bixiyo macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan waxaana naga go'an inaan idin siino warbixintaas.

### **Heerka ay Marayso Shaqada**

Maalintii Talaadada, Abriil 15, shaqada wax looga qabanayo khataraha liidhka ee Xarunta Carruurnimada Hore ee Starms waxaa laga dhameeyay 75%. Inta badan shaqada dib u cusboonaysiinta ee ka socotay dabaqyada sare waa la dhameeyay. Shaqadu waxay ku socotaa dabaqyada hore iyo kuwa hoose, rinjiyeynta dhamaystirka ah ayaa laga wadaa dhismaha oo dhan.

MPS waxay filaysaa in shaqada la dhammeeyo dhammaadka Abriil. Marka xigta, dhismaha ayaa gebigeedba loo nadiifin doonaa, taas oo qaadan doonta, ugu yaraan, dhowr maalmood. Intaa ka dib, Waaxda Caafimaadka ee Magaalada Milwaukee (MHD) waxay tijaabin doontaa dhismaha si ay u ansixiso in la deganaan karo, taas oo inta badan lagu samayn karo 24 saacadood gudahood. Marka MHD ay ansixiso dhismaha inuu yahay meel la degi karo, MPS waxay la shaqayn doontaa hoggaanka iyo shaqaalaha Starms si loo go'aamiyo tillaabooyinka xiga ee dib loogu soo noqonayo goobta.

### **Fursadaha Looga Jawaabayo Wixii Su'aalo ah**

Waxaan u mahadcelineynaa dhammaan intiina ka soo qeybgashay kulanka dadweynaha ee khadka tooska ah ee dhacay Abriil 10. MPS waxay hadda ka jawaabaysaa su'aalo badan oo la waydiiyey intii uu socday kulanka waxayna jawaabaha soo bandhigi doontaa maalmaha soo socda. Waxaan soo dhaweyneynaa wixii su'aalo dheeraad ah ee lagu soo diro [lead@milwaukee.k12.wi.us](mailto:lead@milwaukee.k12.wi.us). Kulan kale oo dadweyne oo loogu talagalay qoysaska LaFollette iyo Xarunta Carruurnimada Hore ee Starms ayaa la qorsheeyay, macluumaadkaasna waxaa la wadaagi doonaa isla marka la helo.

### **Talaabooyinka Xiga**

MPS waxay MHD la dhamaystiraysaa qorshe hawleedkeeda liidhka ee degmada. Marka MHD ay ansixiso qorshaha, MPS waxay la wadaagi doontaa dadweynaha. Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la xiriiraan daryeel-bixiyaha caafimaadka ilmahooda ama ay booqdaan rugta caafimaadka ee si loogu sameeyo baaritaanka liidhka ee caadiga ah

haddii aysan hore sidaas u samaynin. Si aad u hesho wixii warar ah ee soo kordha, goobaha rugaha caafimaadka, iyo ilaha caafimaadka dadweynaha, booqo [mpsmke.com/mpsleadreport](https://mpsmke.com/mpsleadreport) ama [milwaukee.gov/MPS-Lead](https://milwaukee.gov/MPS-Lead). Ilo dheeraad ah ayaa laga heli karaa [milwaukee.gov/HEH](https://milwaukee.gov/HEH).

Waxaan xubin kasta oo qoys iyo xubin kasta oo shaqaale ah uga mahadcelinaynaa iskaashiga ay sameeyeen inta aan sii dhexmeerayno tallaabooyinkan muhiimka ah ee lagu raadinayo badbaadada dhammaan dadkeena. Mar labaad, waxaan soo dhawaynaynaa in wixii su'aalo dheeraad ah lagu soo diro [lead@milwaukee.k12.wi.us](mailto:lead@milwaukee.k12.wi.us).

Daacad kuu ah,  
Xafiiska Maamulka Dugsiga